WAAN IDIN SALAMAAYAA KIRSEBERG IYO JOHANNESLUST!

# Ma rabtaa inaad ka qayb qaadato cilmi baadhis ku saabsan hoygaaga?

Magacaygu waa Matilda waxaan ahay ardayad jaamacadda Malmö dhigata (arday cilmi-baaris ah wada). Mashruucayga cilmi-baaristu waa "Daryeelka tayada guryaha? Cilmi baadhis ka socota nidaamka iyo sistamka guriyeynta ee Iswiidhan" Waxaan bartaa tayada guryeynta ee Iswiidhan, taas oo ah sida aynu u noolnahay, anigoo ku salaysan khibradaha dadka.

**Sidaas darteed, waxaan hadda raadinayaa dadka waaweyn (18 sano jir ama ka weyn) ee deggan Kirseberg iyo Johanneslust kuwaas oo doonaya inay ka qaybqaataan cilmi baarista iyagoo wareysi lala yeelanayo.**

Waxaan rabaa in aan wareysiga ku ogaado sida aad u aragto oo aad u dareemayso hoygaaga. Inta lagu jiro waraysiga, waxaan ku weydiinayaa tusaale ahaan su'aalo la xiriira sidii aad markii hore u deggenayd, sida aad u aragto guriga aad hadda deggen tahay iyo sida uu nolol maalmeedkaaga uga shaqeeyo. Danta aan leeyahay waa in aan wax ka ogaado fikirkaaga iyo waayo aragnimadaada, ee ma aha in aan baaro wax gaar ah oo ku saabsan gurigaaga.

Waxaan ku sameyn karaa wareysiyada luqadda iswiidhishka ah ama luqadda ingiriiska, laakiin haddii aad doorbideyso luqad kale, waxaynu isticmaali karnaa turjubaan. Waxaynu ku kulmi karnaa gurigaaga ama meel kale. Magacaaga laguma sheegi doono waxa aan qorayo ee ku salaysan cilmi baadhistayda.

Soo dhawoow inaad ila soo xiriirto haddii aad rabto inaad ka qaybqaadato ama aad rabto inaad wax badan ka ogaato mashruuca!

Salaan saaxiibtinimo,
Matilda Annemark Sandberg

Tel: 040-665 86 10

E-mail: matilda.v.sandberg@mau.se

MALMÖ UNIVERSITET